

**Waraaqa
xaqiiqda xaquuqda
dhalashada ee
aasaasiga ah**



Waraaqda xaqiiqda xaquuqda dhalashada ee aasaasiga ah

Waraaqaha xaqiiqda Birthrights waxay ku siinayaan macluumaad ku saabsan xuquuqdaada aadanaha markaad uurka leedahay iyo markaad dhaleyso.

Warqadaan xaqiiqadu waxay sharraxaysaa xuquuqdaada aasaasiga ah ee daryeelka hooyonimada. Waxaan haynaa waraaqo kale oo xaqiiqooyin ah oo lagu heli karo Ingiriisiga degelkeena: www.birthrights.org.uk

1. Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si sharaf iyo ixtiraam leh markasta.

Sharciga xuquuqda aadanaha waxaa loola jeedaa in ururada dadweynaha sida isbitaalada ay kula dhaqmaan si sharaf iyo ixtiraam leh.

Xirfadleyda daryeelka caafimaadka (takhaatiirta iyo umulisoooyinka) waa inay edeb iyo ixtiraam kuu muujiyaan.

Waa inay kugu dhiiri geliyaan inaad go'aan ka gaarto daryeelkaaga.

Waa inaysan iska dhaadhicin maloooyin adiga kugu saabsan ama daryeelka aad u baahan tahay.

Xirfadleydaada daryeelka caafimaad waa inay hubiyaan inaad heysato turjubaan haddii aad u baahato mid si aad markaas go'aan uga gaarto daryeelkaaga.

Waa inaad lahaato asturnaan marka aad u baahan tahay, tusaale ahaan xilliga foosha ama haddii aad naas nuujinayso, oo waa inaan lagaa tagin inaad dareento soo-gaadhis ama u nugul.

Haddii aad leedahay baahiyo gaar ah, tusaale ahaan, waxaad kaliya dooneysaa inaad aragto xirfadlayaal daryeel caafimaad dumar ah, markaa tan waa in la ixtiraamo haddii ay suurogal tahay. Haddii aysan taasi suurogal ahayn - tusaale ahaan, waxaad dooneysaa xanuun joojiye inta lagu jiro foosha oo waxaa la heli karaa oo keliya ragga dhakhaatiirta ah - markaa waa in lagu siiyaa macluumaadka aad u baahan tahay si aad u go'aansato waxa aad sameynayso.

Haddii aad leedahay naafonimo ama xaalad caafimaad oo muddo dheer ah, xirfadleydaada daryeelka caafimaad waa inay hubiyaan inaad uhesho daryeel siman oo aan lagaa faa'iidayaan. Tan macnaheedu waxay noqon kartaa inaan ku siiso daryeel ka duwan ama dheeraad ah ama ku siiso taageero aad u baahan tahay (tusaale ahaan, helitaanka musqusha naafada ah, helitaanka taageero dheeri ah kadib markii aad dhasho ilmahaaga, ama qorshe aad u aamusnaato sida ugu macquulsan haddii buuqkugu keenayo cidhiidhi).

2. Waxaad had iyo jeer xaq u leedahay inaad diido.

Markaad uur leedahay waxaad xaq u leedahay inaad go'aan ka gaarto jirkaaga, sida aad u sameysato waqti kasta oo kale.

Xirfadlayaasha caafimaadku waa inay ku weydiiyaan inaad ogolaato wax daaweyn ah. Tusaale ahaan, waa inay ku weydiiyaan kahor intaanay ku baarin, kahor intaanay dhiig-karkaaga qaadin, iyo kahor intaanay kusiin xanuun baabi'iye. Tani waa sharciga.

Sharciga ayey ka soo horjeedaa in lagu siiyo daaweyn caafimaad ilaa aad ka ogolaato mooyee.

Had iyo jeer waa caadi inaad tiraahdo maya. Tan waxaa lagu magacaabaa diidmada ogolaanshaha.

Haddii aad rabto daaweyn oo aad tiraahdo haa, tan waxaa lagu magacaabaa bixinta ogolaanshaha.

Waad weydiisan kartaa waqti dheeraad ah si aad u gaadho go'aankaaga haddii aad u baahato.

Xitaa haddii aad bixiso oggolaansho, waad beddeli kartaa go'aankaaga.

Xitaa haddii xirfadlayaasha caafimaadku aysan kugu raacsaneyn go'aannadaada ku saabsan jirkaaga, waa inay ixtiraamaan.

Sharci ahaan, ogolaanshahaagu waa inuu noqdaa mid dhab ah. Tan macnaheedu waa inaad si fiican u fahamto daaweynta ku filan si aad go'aan u gaarto. Waa in lagu siiyaa macluumaad qaab aad fahmi karto, iyo macluumaad ku saabsan halista iyo faa'iidooyinka labadaba ee muhiim kuu ah adiga.

Qofna, oo ay kujiraan qoyskaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadku waa inaysan ku cadaadinin adiga ama kuugu cagajuglayn inaad ogolaato inaad hesho wax daaweyn ah. Laguma soo diri karo adeegyada bulshada sababo la xiriira go'aamada aad ka gaarto dhalashadaada.

Sharci ahaan, ilmuhu xuquuq ma laha ilaa uu ka dhasho. Tani waxay ka dhigan tahay inta uurka iyo dhalashada aan lagu siin karin daaweyn illaa aad ka ogolaato, xitaa haddii xirfadlayaasha daryeelka caafimaad ay u maleynayaan in daaweynta loogu baahan yahay ilmahaaga aan dhalan. Waxaad xor u tahay inaad sameyso xulashooyin lid ku ah talobixinta caafimaadka.

Waqtiga kaliya ee ay dadka kale go'aano kuu gaari karaan waa hadii aadan laheyn awood maskaxeed oo aad go'aan ku gaarto. Tani waa dhif iyo naadir. Markay taasi dhacdo, kuwa kale (tusaale ahaan, dhakhaatiirtaada) waa inay raacaan habsocodyada sharciga ee Xeerka Awood Maskaxeed (Mental Capacity Act) si go'aan loogu gaadho 'danahaaga ugu fiican'.

3. Markaad weydiisato daryeel, adeegyada hooyonimadu waa inay ka bilowdaan 'haa' oo ay keliya maya dhahaan haddii ay leeyihiin sabab macquul ah.

Haddii aad rabto inaad adeeg gasho, bixiyaha umulintu waa inuu 'ka bilowdaa ogolaansho'. Waa inay ku dadaalaan sidii ay u dabooli lahaayeen codsigaaga.

Inta lagu jiro daryeelkaaga, waxaad xaq u leedahay inaad sameeyso xulashooyinka adiga kuu habboon. Tusaale ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad doorato halka aad ku dhaleyso. Waxaad dooran kartaa inaad ku dhasho cisbitaal, guriga ama xarunta dhalmada (qeybta dhalmada oo ay maamulaan umulisooyin). Waa inaad awoodid in lagugu qalo qalliinka haddii aad rabto mid.

Mararka qaarkood waxaa jira xayiraad ku saabsan xuquuqdaada inaad sameeyso xulashooyinka qaarkood. Tusaale ahaan, xarumaha dhalmada waxaa laga yaabaa inay leeyihiin sharciyo sheegaya cidda adeegsan karta, ama isbitaallada ayaa yeelan kara sharciyo ku saabsan cidda lahaan karto biyo ku dhalid. Kuwani maaha xeerar sharci ah.

Markaad codsatid adeegga hooyonimada, waa inay isku dayaan inay sameeyaan waxa aad rabto. Waa inay kaliya yiraahdaan maya haddii aysan si ammaan ah kuu siin karin daryeelka aad rabto.

Waa inay gaaraan go'aan ku saleysan xaaladaada shaqsiyadeed isla markaana ay kuu sharaxaan sababaha.

Iskama dhihi karaan siyaasadooda ama qawaaniintoodu ayaa diidan.

Waxaa jira xulashooyin aad marwalba sameyn karto. Tusaale ahaan, haddii aad rabto inaad ku dhasho guriga, cidna kuma qasbi karto inaad isbitaal aado. Sidoo kale waa sharci in la dhalo iyada oo aynan ku caawin umulisooyinka ama dhakhaatiirta.

Haddii aan lagu dhageysanayn, ama xulashadaada aan la ixtiraamin, waxaad codsan kartaa inaad la hadasho Madaxa Umulisada (umulisada sare) (Head of Midwifery) (senior midwife). Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Birthrights si aad talo uga hesho adoo email u diraya: advice@birthrights.org.uk.

4. Waxaad xaq u leedahay in lagu daboolo dhammaan baahiyahaaga aasaasiga ah.

Haddii aad ku jirto isbitaal, waa inaad awood u yeelato inaad hesho dhammaan waxyaabaha aasaasiga ah ee aad u baahan tahay, tusaale ahaan, cuntada, biyaha, xanuun joojinta iyo taageerada si aad musqusha u aado.

Waa in lagu dhageystaa oo aan lagu dhalyaysan markaad weydiisato caawimaad ama daryeel.

Haddii aad weydiisato xanuun joojinta foosha, waa in lagu siiyaa haddii aysan jirin sabab caafimaad oo wanaagsan oo loo diido. Hadday jirto, takhtarkaaga ama umulisada waa inay kuu sharxaan sababta oo ay qoraan wadhadalkaaga.

Haddii aan lagu dhageysanayn, waxaad codsan kartaa inaad la hadasho umulisada weyn ama dhakhtarka qaybta aad ka deggan tahay.

5. Waxaad xaq u leedahay in lagu taageero oo aad u wada joogtid qoys ahaan.

Xuquuqda aadamigu waxay ku siineysaa xuquuqda aad ku dooran karto halka iyo sida aad ku dhaleyso, iyo cidda kula joogta.

Waa inaad awoodid inaad doorato qofka kula joogayo intaad foolanaysid. Isbitaalada iyo xarumaha dhalmada waxaa laga yaabaa inay leeyihiin siyaasado sheegaya inta qof ee kula joogi kara, badanaana uma oggola inay carruurta kula joogaan. Kuwani waa siyaasado isbitaal laakiin ma ahan xeerar sharci ah. Waad la hadli kartaa umulisadaada ama waad weydiisan kartaa inaad la hadasho umulisada sare haddii aad walwalsan tahay.

Umulisadaada waad u sheegi kartaa haddii uu jiro qof aadan rabin inaad aragto inta lagu jiro foosha ama kadib marka aad dhasho ilmahaaga.

6. Waxaad xaq u leedahay inaad cabato.

Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si sharaf iyo ixtiraam leh markasta inta lagu jiro daryeelkaaga.

Haddii aad ka walwalsan tahay daryeelkaaga inta aad uurka leedahay, waxaad la hadli kartaa umulisadaada ama dhakhtarkaaga, ama Madaxa Umulisada (umulisada weyn) (Head of Midwifery) (senior midwife) ee xaruntaada caafimaad (Trust).

Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta, ama aad u malaynayso inaan laguula dhaqmin si sharaf iyo ixtiraam leh, waad samayn kartaa cabasho. Waa caadi inaad dacwad sameyso xitaa haddii aad u maleyneyso in waxa kugu dhacay ay ahaayeen wax yar ama aan waxyeello halis ah la sameyn.

Kooxda Talobixinta Bukaanka iyo Xiriirka Adeegga (The Patient Advice and Liaison Service (PALS) team) ee isbitaalkaaga ayaa kaa caawin kara inaad dacwad sameyso.

Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta, waxaad dacwadaada u gudbin kartaa Ombudsman-ka.

Birthrights waxay kaloo bixiyaan talo bilaash ah oo ku saabsan xuquuqdaada iyo sameynta cabasho. Waxaad kula xiriiri kartaa Birthrights adigoo u diraya emayl: advice@birthrights.org.uk.

7. Waxaad had iyo jeer xaq u leedahay inaad hesho daryeel.

Dadka 'caadi ahaan degan' UK waxay xaq u leeyihiin inay helaan daryeelka NHS oo lacag la'aan ah. Haddii aadan 'caadi ahaan deganeyn' waxaa laga yaabaa inaad bixiso kharashka daryeelkaaga.

Xitaa haddii ay tahay inaad bixiso kharashka daryeelka oo aadan awoodin inaad bixiso, weli waa in lagu siiyaa daryeelka hooyonimada. Laguma sheegi karo inaad sugto ilaa intaad ka bixin karto.

Xeerarka ku saabsan cidda ay tahay in ay bixiso, iyo sida lacag-ku-daliciddaay u shaqeyso ayaa adag.. Haddii aad ka walwalsan tahay inaad bixin doonto daryeelkaaga hooyonimo, hay'adda samafalka ah ee Maternity Action ayaa kaa caawin karta. Waxay macluumaad qadka ah. Waxay sidoo kale bixiyaan adeeg talo bixin email ah iyo a [fadeeg talo bixin taleefan oo bilaash ah](#) oo ay kujirto turjubaanka telefoonka.

Afeef: Warqadahayaga xaqiiqooyinku waxay bixiyaan macluumaad ku saabsan sharciga dalka Ingriiska (UK). Macluumaadku waxa uu saxsan yahay waqtiga la qorayo (oo ah May 2021). Sharciga aaggan waa la badali karaa. Birthrights mas'uul kama noqon karto haddii isbeddelada sharciga lagu sameeyay tirtiraan daabacaaddan. Birthrights mas'uul kama aha khasaaraha ka yimaada isku halaynta macluumaadka ku jira warqadan-xaqiiqooyinka. Birthrights waxay bixisaa xiriiro(links) ku geynaya degello ama websaydyo saddexaad halkaas oo kuwani ay gacan ka geysan karaan bixinta macluumaad dheeraad ah. Birthrights wax masuuliyad ah iskama saareyso waxyaabaha ku jira websaydadaas ama deggeladaas xiriiriyayaashuna(links) waa in aan loo qaadin inay yihiin oggolaansho.